# TILMAAMAHA HELITAANKA AMARKA ILAALINTA MADANIGA AH

**Tilmaamahan caadiga ah waxaa loogu talo geley ujeedo macluumaad sheeg oo kaliya oo maaha talo sharci oo ku saabsan kiiskaaga. Hadii aad doorato in aan naftaada matasho, waxa ku qabanaya shuruuc iyo nidaamyo lamid ah kuwa looyarka.**

## MACLUUMAADKA GUUD KAHOR INTA AANAD XARAYNIN CABASHADAADA/DACWADAADA

- Amarka Ka Ilaalinta Madaniga ah ee Kumeel Gaadhka ama Rasmiga ah waxaa lagu soo oogi karaa qof wayn ama ilmo yar oo ah toban jir ama ka wayn.
- Amarka Ka Ilaalinta waxa uu ka dhigan yahay wixii Amar ah ee ka mamnuucaya Qofka Lagu Amray inaanu Qof u Dhawaan in uu u tago/la xidhiidho, dhibaateeyo, dhaawaco, handado, ku tacadiyo, u hanjabo, taabto, daba guro, tacadi galmo ku sameeyo ama ku xadgudbo Qof La Ilaaliyay, ama inuu ugu galo ama uu la joogo meel, ama in uu uga soo dhawaado masaafad la xaddiday Qofka La Ilaaliyay ama gurigiisa, ama inuu qaado, wareejiyo, meel kusoo xidho, waxyeeleeyo, tuuro ama ugu hanjabo waxyeelo xayawaanka uu leeyahay, haysto, kiraystay, ama uu haysto Qofka La Ilaaliyay, ama wixii xukun ah ee kale ee lagaga ilaalinayo Qofka La Ilaaliyay khatarta nololeed ama caafimaad ee degdegga ah.
- Meeshu waxay haboon tahay wixii degmo ah ee ficilada ay ka imanayaan Cabasho/Dacwad, degmo kasta oo dhinacyada degan yihiin, ama wixii degmo ah ee hal dhinac uu ka shaqeeyo.
- Si loo helo amarka haynta caruurta yaryar, waxa aad u baahan tahay inaad xarayso kiiska la xidhiidha tacadiga guriga maxkamada deegaanka.
- Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan waxa aad ka akhridaa Sharciga Dib u Eegista Lagu Sameeyay ee Colorado §13-14-104.5, §13-14-105, §13-14-105.5, iyo §13-14-106.
- Hadii aad qabto laxaad la'aan una baahantahay qaabilaad macquul ah si aad u isticmaasho maxkamada, fadlan la xidhiidh Isku Duwahaaga ADA ee deegaanka. Macluumaadka xidhiidhka waxaa laga heli karaa websaytka soo socda:
  **http://www.courts.state.co.us/Administration/HR/ADA/Coordinator_List.cfm**

## WEEDHAHA CAAMKA AH

| | |
|---|---|
| ⌦ Codsi-gudbiye: | Qofka ama ganacsiga ka xaraynaya Cabasho/Dacwad qof. |
| ⌦ Jawaab-bixiye: | Qofka Cabashada/Dacwada laga xareeyay. |
| ⌦ Cabashada/Dacwada: | Waraaqaha si rasmi ah u bilaabaya nidaamka Amarka Ilaalinta. |
| ⌦ Tacadiga Guriga: | Ficil, isku day ficil, ama ficil hanjabaad oo dagaal, daba guris, dhibaatayn, ama khasbid oo loo gaysto qof uu u gaysto qof kale oo qofka u gaysanayaa uu wakhtigan ama hore uga dhaxeeyay xidhiidh, ama qofka ficilka gaysanayaa uu la nool yahay ama uu hore ugu la noolaa guri, ama qofka gaysanaya uu la leeyahay ama hore ula lahaa xidhiidh jacayl. |
| ⌦ Qofka La Ilaaliyay: | Qofka, dadka, ama ganacsiga la siiyay Amarka Ilaalinta. |
| ⌦ Qofka Lagu Amray inaanu Qof u Dhawaan: | Qofka la doonayo in aanu usoo dhawaan qofka kale ama ganacsi. |
| ⌦ Dhici kartaa: | Weedha sharciga ah ee, "dhici kartaa" waxaa lagu sheegaa "ikhtiyaar" ama "awood." |
| ⌦ Waa inuu: | Weedha sharciga ah, "waa inuu" waxay muujinaysaa "waajib." |

**Hadii aanad fahmin macluumaadkan, fadlan la xidhiidh garyaqaan.**

## KHARASHKA

Maxkamadu waxay ka qaadi kartaa khidmad xareyn Qofka doonaya amarka ilaalinta. Kharashka xaraynta ee $85.00 ayaa waajib ah **marka laga tago** marka Qofka doonaya amarka ilaalinta uu yahay dhibane tacadiga guriga dhaxdiisa, daba gur, tacadiga galmada ama xidhiidh galmo oo aan munaasab ahayn. Hadii Qofka doonaya amarka ilaalinta aanay ku waajib ahayn inuu bixiyo kharashka xaraynta, Maxkamadu waxay ku qiimayn doontaa kharashka xaraynta, kharashka u gaynta qofka iyo kharashka looyarka ee ka dhanka ah Qofka Lagu Amray inaanu Qof u Dhawaan Dhagaysiga Amarka Ilaalinta Rasmiga ah.

Kharashaadka kale ee ay dhici karto inaad bixiso waxaa weeye sida soo socota:

| | | |
|---|---|---|
| ❑ | Koobiyaynta Waraaqaha | $.75 boggiiba |
| ❑ | Kharashka Xaqiijinta | $20.00 waraaqihiiba |
| ❑ | Kharashka U Gaynta | Waa uu Kala Duwan Yahay (la siinayo u geeyaha) |

# FOOMAMKA

Si aad u hesho foomka onleynka ah booqo [www.courts.state.co.us](http://www.courts.state.co.us) oo guji **"Forms (foomamka)"** taabka ah. Xidhmada/foomamka waxaa lagu heli karaa PDF ama WORD iyada oo la dooranayo **"Amarrada Ilaalinta".** Waxa aad ku buuxin kartaa foomka onleyn ahaan oo waad daabici kartaa ama inta aad daabacdo ayaad daabici kartaa ama ku qori kartaa far waaweyn oo la akhriyi karo khad madaw. Waxa aad u baahan kartaa dhamaan ama wax kamid ah foomamkan. U akhri tilmaamahan si taxadir leh si aad u ogaato foomamka aad u baahan tahay.

- ❑ JDF 401 Waxyaabaha La Eego ee Dhacdada
- ❑ JDF 402 Cabashada/Dacwada La Xaqiijiyey ee Amarka Ilaalinta
- ❑ JDF 404 Bayaanka Caruurta Ku Saabsan
- ❑ JDF 442 Xaashida Macluumaadka ee Duwaan Gelinta Amarka Ilaalinta

# TALAABOOYINKA XARAYNTA KIISKAAGA

## Talaabo1: Buuxi Foomamka Ku Munaasabka ah.

Fadlan waxa aad ka eegtaa liiska foomamka loo baahan yahay xaga sare si aad u ogaato foomamka ay tahay in aad gudbiso kuwaas oo ku salaysan xaaladaada shakhsi ahaaneed.

- ❑ La xidhiidh Maxkamada aad doonayso inaad ka xarayso kiiskaaga maalmo ama saacado cayiman marka la qabto ballanta dhagaysiga amarka ilaalinta iyo si aad u ogaato hadii ay jiraan shuruudo kale oo xaraynta ah.

- ❑ **Cabashada/Dacwada La Xaqiijiyey ee Amarka Ilaalinta (JDF 402).**
  - ❑ Buuxi dhamaan macluumaadka daruuriga ah ee ku yaala foomka.
  - ❑ Waxa aad sheegtaa oo kaliya waxa loo baahan yahay oo waxa aad wada bixisaa macluumaadka oo dhan ee lagu ogaan karo sababta aad u doonayso amarka ilaalinta.
  - ❑ Hadii aad doonayso inaan lagu qorin cinwaankaaga iyo taleefankaaga dacwada, sax sanduuqa lambar 6 ee Cabashada/Dacwada.
  - ❑ Waxa aad ku dartaa cinwaan boos oo kale meesha banaan ee ku taala boga 4 hadii ay macquul tahay. Tusaale ahaan waxa aad ku dartaa P.O. Box, xubin qoys, ama saaxiib aad ku kalsoon tahay cinwaankiisa boosta.

- ❑ **Waxyaabaha La Eego ee Dhacdada (JDF 401).**
  - ❑ Waxa aad buuxin kartaa foomkan si ay kaaga caawiso u diyaar garawga dhagaysigaaga.
  - ❑ Waad haysan kartaa ama waxa aad la xarayn kartaa Cabashadaada/Dacwadaada La Xaqiijiyey.
  - ❑ **Hadii aad xarayso foomkan, waxay qayb ka noqon doontaa duwaanka shacabka oo waxaa la siin doonaa dhinaca kale taas oo qayb ka ah Cabashada/Dacwada.**

- ❑ **Bayaanka Caruurta Ku Saabsan (JDF 404).**
  - ❑ Hadii aad doonayso in aad dalbato daryeel kumeel gaadh ah iyo xakamayn, go'aan gaadhista kumeel gaadhka ah, ama wakhtiga waalidnimada ee caruurta ama amarka ilaalinta ee loogu danaynayo wixii ilmo yar ah, waa inaad buuxiso foomkan.
  - ❑ Dhaartan waa in lagu hor sexeexaa Karaaniga Maxkamada ama Nootaayada Shacabka

- ❑ **Xaashida Macluumaadka Duwaan Gelinta Amarka Ilaalinta (JDF 442).**
  - ❑ Buuxi foomkan oo ku lifaaq Cabashada/Dacwada La Xaqiijiyey ee Amarka Ilaalinta (JDF 402).
  - ❑ Waxaa muhiim ah in macluumaadka uu noqdo mid buuxa oo sax ah si loogu dhaqan geliyo amarka ilaalinta.

## Talaabada 2: Waxa aad diyaar u tahay inaad u xarayso waraaqahaaga Maxkamada.

- ❑ Waxa aad siisaa Maxkamada waraaqaha buuxsan sida ku cad Talaabada 1 ee sare.
- ❑ Hadii Cabashada/Dacwada iyo/ama Dhaarta aan la saxeexin iyada oo la hor joogo Nootaayada Shacabka, waxa aad buuxin doontaa Cabashada/Dacwada iyo/ama Dhaarta kahor Maxkamada wakhtigan.

## Talaabada 3: Dhagaysiga Amarka Ilaalinta Kumeel Gaadhka ah.

- ❑ U diyaar ahaw maadaama oo lagu waydiin karo su'aalo ku saabsan dalabkaaga inaad hesho amarka ilaalinta kumeel gaadhka ah iyo wixii mushkilado ah ee ku saabsan caruurta, hadii ay ku munaasab tahay.
- ❑ Hadii ay maxkamadu ay bixiso amarka ilaalinta kumeel gaadhka ah, waxaa lagu siin doonaa Amarka qoran ee sheegaya sidaas.
- ❑ **Marka aad hesho Amarka Ilaalinta Kumeel Gaadhka ah, waxa aad u baahan doontaa waxyaabaha soo socda:**
  - ❑ Helitaanka Nuqullada La Xaqiijiyey ee Amarka. Tirada nuquladu way kala duwan yihiin oo waxay ku xidhan yihiin xaaladaada.
    - ❑ Waxa aad u baahan tahay mid adigu oo midna waxaa la siinaya Qofka Lagu Amray inaanu Kuu Soo Dhawaan.
    - ❑ Hadii lagu siiyay daryeelka kumeel gaadhka ah iyo xakamaynta, wakhtiga waalidnimada iyo/ama go'aan gaadhista kumeel gaadhka ah ee ilmaha yar ama haddii Qofka Lagu Amray inaanu Kuusoo Dhawaan lagu armay in aanu lasoo xidhiidhin caruur yaryar, waxa aad u baahan tahay nuqulo la dhigo shaqadaada, dugsiga caruurta, xanaanada caruurta, iwm.
    - ❑ **Xasuuso inaad haysato nuqulka Amarka Ilaalinta iyo Bayaanka/Xaqiijinta Gaadhsiinta wakhti kasta.**

## Talaabada 4: Inaad Gacanta ka Saarto Qofka.

Waa inaad gaadhsiisaa qofka kale nuqulka Cabashada/Dacwada, Amarka Ilaalinta Kumeel Gaadhka ah iyo Bayaanka/Xaqiijinta U Gaynta sida uu dhigayo sharciga 4(e) ee Shuruucda Colorado ee Nidaamka Madaniga ah kahor Dhagaysiga Amarka Rasmiga ah ama taariikhda dhagaysiga xiga ee ay dejisay Maxkamadu. Dhagaysiga Amarka Rasmiga ah waxaa caadiyan la qabtaa 14 maalmood oo ka bilaabma Dhagaysigaaga Amarada Rasmiga ah ama Maxkamada waxaa loo dejin doonaa dhagaysi mustaqbalka ah si looga jawaabo saacada waalidnimada iyo masuuliyada go'aan gaadhista. **Ishaaro Waxku Ool ah si loo sameeyo gaadhsiinta shakhsiga:**

- ❑ Qaado nuqul Amarka Ilaalinta Kumeel Gaadhka ah, Cabashada/Dacwada, iyo Bayaanka/Xaqiijinta Gaadhsiinta bilayska, cida gaarka ah uu gaadhsiinaysa qofka ama qof ah 18 jir ama ka wayn, oo aan kiiska cid ka ahayn, oo garanaya shuruucda gaadhsiinta Eedeysanaha.
- ❑ Waxa aad xaqiijisaa in bilayska, cida gaarka ah ee gaadhsiinaysa ama qofka u gaynaya waraaqaha inay soo celiyaan waraaqaha rasmiga ah iyo nuqulka Bayaanka/Xaqiijinta Gaadhsiinta adiga.
- ❑ Xasuuso inaad keento **nuqulka rasmiga ah** Maxkamada maalinta Dhagaysigaaga Amarada Rasmiga ah.
- ❑ Soo qaado Bayaanka/Xaqiijinta u Gaynta lasoo celiyay oo ay la socdaan Amarka Ilaalinta Kumeel Gaadhka ah. Waxay noqon kartaa in aad labada foomba siiso bilayska.
- ❑ Hadii qofka u gaynaya uu u gayn kari waayay, waxa aad waydiisaa Maxkamada si aad u ogaato talaabo kale oo la samayn karo oo lagu sameeyo u gaynta.

## Talaabada 5: Dhagaysiga Amarada Rasmiga ah.

Waydii Maxkamada macluumaadka ama waxa jiri kara barnaamij u ololayn dhibane oo aagaaga ah oo ku caawin kara. Waxa aad la hadli kartaa markhaati oo waxa aad keeni kartaa cadaymo hadii aad doonayso. Maxkamadu waxay soo saari doontaa yeedhmo markhaati hadii loo baahdo.

- ❑ **Hadii aad hesho Amarka Ilaalin Kumeel Gaadh ah, waa inaad:**
  - ◆ Kaalay dhagaysiga amarada rasmiga ah ama taariikhda dhagaysiga xiga ee Maxkamada taariikhda iyo saacada lagu qabtay Amarka **ama Amarka Ilaalinta Kumeel Gaadhka ah wuu dhici doonaa.**
  - ◆ Soo qaado Bayaanka/Shahaadada U Gaynta oo waxa aad u gudbisaa Maxkamada.

- ❑ Hadii ay maxkamadu ay bixiso Amar Ilaalinta Rasmi ah, waxaa lagu siin doonaa amarka qoran ee sheegaya taas. Marka aad hesho Amarka Ilaalinta Rasmiga ah, waxa aad u baahan doontaa inaad samayso waxyaabaha soo socda:
  - ❑ Helitaanka Nuqullada La Xaqiijiyey ee Amarka. Tirada nuquladu way kala duwan yihiin oo waxay ku xidhan yihiin xaaladaada.
    - ❑ Waxa aad u baahan tahay mid adigu oo midna waxaa la siinaya Cida Lagaa Ilaalinayo.

- ❑ Hadii Qofka Lagu Amray inaanu Kuusoo Dhawaan lagu armay in aanu la xidhiidhin caruur yaryar, waxaad dhigi kartaa nuqulo shaqadaada, dugsiga caruurta, xanaanada caruurta, iwm.

- ❑ Hadii Qofka Lagu Amray inaanu Qof u Dhawaan uu joogo wakhtiga dhagaysiga, Maxkamadu waxay siin doontaa Amarka isaga/iyada oo in la gaadhsiiyo looma baahna.
- ❑ Hadii Qofka Lagu Amray inaanu Qof u Dhawaan aanu joogin oo Amarka Ilaalinta Rasmiga ah uu ka duwan yahay Amarka Ilaalinta Kumeel Gaadhka ah, waa in markaa la gaadhsiiyo. **Ishaaro Waxku Ool ah si loo sameeyo gaadhsiinta shakhsiga:**
  - ❑ Qaado nuqul Amarka Ilaalinta Rasmiga ah, Cabashada, iyo Bayaanka/Xaqiijinta Gaadhsiinta bilayska, cida gaarka ah uu gaadhsiinaysa qofka ama qof ah 18 jir ama ka wayn, oo aan kiiska cid ka ahayn, oo garanaya shuruucda gaadhsiinta Eedeysanaha.
  - ❑ Waxa aad u gaysaa bilayska, u geeyaha gaarka ah, ama qof u geeya amarka oo soo celiya nuqulka Bayaanka/Xaqiijinta U Gaynta oo uu keena oo waxa aad ku xaraysaa **nuqulka rasmiga ah** Maxkamada sida ugu dhakhsaha badan kadib marka la gaadhsiiyo.
  - ❑ Hadii qofka u gaynaya uu u gayn kari waayay, waxa aad waydiisaa Maxkamada si aad u ogaato talaabo kale oo la samayn karo.

**Xasuuso inaad haysato nuqulka Amarka iyo Bayaanka/Xaqiijinta Adeega wakhti kasta.**